



Adeegyada iyo Taageerada Muddada-Dheer ee Washington Apple Health

Washington Apple Health waa magac lagu isticmaalo Gobolka Washington oo la mid ah Medicaid, barnaamijka caymiska caafimaadka carruurta (CHIP), iyo barnaamijyada daryeelka caafimaadka ee uu gobolka-kaliya maalgeliyo.

Kumaa maareeya Barnaamijka Apple Health?

Apple Health waxaa maareeya Maamulka Daryeelka Caafimaadka (HCA) ee Gobolka Washington. Wax badan ka baro: hca.wa.gov/apple-health.

Muxuu kaa bixinayaa Apple Health?

Apple Health wuxuu kaa bixinayaa kharashka adeegyo badan. Adeegyada badankooda uma baahna lacag-bixinta caymiska la wadaago mana ahan in aad buuxiso lacag ka jaridyada. Kuwan waa qaar ka mid ah kuwa ugu caansan:

- Booqashooyinka takhtarka
- Isbitaal-dhigidyo
- Daawooyin
- Tallaalada
- Daaweynta ilkaha
- Baaritaannada aragga
- Caafimaadka maskaxda
- Qorshaynta qoyska
- Daaweynta daroogada iyo khamriga
- Gaadiidka caafimaadka
- Kharash-wadaaga Medicare

Waa maxay sababta aan ugu baahanahay Apple Health haddii aan u haysto Medicare caymiskeyga aasaasiga ahaan?

Apple Health wuxuu kaa bixin karaa kharashaadka la wadaago ee Medicare. Tani ayaa kaa caawineysa in ay lacag kuu harto. Haddii aad u qalanto, Apple Health wuxuu bixinayaa kharashaadka Medicare:

- Kharashaadka caymiska la wadaago
- Lacagaha laga jari karo
- Lacag-bixinta caymiska ee la wadaago

Barnaamijyada Apple Health qaarkood waxay bixiyaan lacagta joogtada ah ee caymiska Qaybta B ee Medicare – tani waxay kuu badbaadin kartaa in ka badan \$100 bishii! Haddii aad doonayso macluumaad badan, ka eeg hca.wa.gov/assets/free-or-low-cost/22-500.pdf.

Halkeen wax badan ka ogaan karaa?

- Eeg mareegtada HCA oo ah www.hca.wa.gov/apple-health ama ka wac lambarka hoos ku qoran.
- Ogow wax badan oo ku saabsan waxa la filan karo marka aad isku qorto Apple Health: *Hagaha Qofka Hadda Ugu Horreysa ee Washington Apple Health* hca.wa.gov/assets/free-or-low-cost/19-024.pdf.

La xiriir HCA haddii aad qabto su'aalo ku saabsan caynsanaantaada

Telefoon: 1-800-562-3022 (TRS: 711)

Isniin – Jimco, 7 a.m. – 5 p.m.

LA HELI KARO: Email-ka askmedicaid@hca.wa.gov ama booqo

<https://fortress.wa.gov/hca/p1contactus/>

Ka waran haddii aan u baahanahay Adeegyada iyo Taageerada Muddada-Dheer?

Kala xiriir xafiiska degaanka ee Adeegyada Guriga iyo Bulshada (HCS) ama xafiiska Hay'adda Degaankaaga ee Gabawga (AAA) wixii caawimaad ah ee ku saabsan ikhtiyaarada la heli karo ee sharaxaadda Taageerada iyo Adeegyada Muddada Fog (LTSS).

Waxa la tixgeliyo

Ma u baahanahay Apple Health si aan u bixiyo kharashkeyga caafimaadka?

Waxaad keliya xaq u yeellan kartaa Apple Health iyadoo sabab u ah in aad caawimo hesho oo loo marayo barnaamijka COPES.

- Barnaamijka COPES wuxuu siiyaa caynsanaan caafimaad dadka xaqa u leh. Haddii aad doorato in aad joojiso COPES waxaad sidoo kale joojin kartaa caynsanaanta caymiskaaga caafimaadka.

Ma u maleynaayo in aan awoodi karo in aan bixiyo lacagta qaybteyda adeegyada LTSS?

- Ma ahan in aad bixiso lacagta ka-qeybgalka ee barnaamijyada LTSS qaarkood. Weydii maamulaha kiiskaaga wixii ku saabsan barnaamijyada Community First Choice ama Medicaid Alternative Care (MAC) waxaadna eegtaa haddii aad u-qalanto.

Uma maleynaayo in aan hadda u baahanahay caawimaad badan. Ma leeyahay ikhtiyaaro aniga oo aanan xulan Apple Health?

- Waxaa jira barnaamij siiya caawimaad daryeelayaasha qoyska iyo dadka aan daryeelaha lahayn. Looma baahna in aad xaq u yeelato Apple Health si aad ugu qalanto. Weydii Taageerada Isku-xiran ee loogu talagalay barnaamijka Waayeellada ee Tailored Supports for Older Adults (TSOA). Qofka qaadana daryeelka waa in uu jiro da'da 55 ama ka weyn.

Khayraadada daryeelaha ee dheeraadka ah

- dshs.wa.gov/altsa/home-and-community-services/caregiver-resources
- dshs.wa.gov/sites/default/files/publications/documents/22-1739.pdf

Waxaan ka walwalsanahay Maal Ka-soo-ceshiga Hantida Dhaxalka. Sideen ku oggaan karaa haddii aniga la ii adeegsan karo?

- Maal Ka-soo-ceshiga Hantida Dhaxalka waxaa keliya loogu talagalay barnaamijyada LTSS qaarkood ee looguma talogalin kharashka Apple Health oo dhan. Maal Ka-soo-ceshiga Hantida Dhaxalka looma adeegsado barnaamijyada MAC ama TSOA. Hubso in aad ina weydiiso haddii aad qabto su'aalo ku saabsan Maal Ka-soo-ceshiga Hantida Dhaxalka.

Ma la iga rabaa kharash badan oo ah kharashka daawada la isu qoro oo loo baahan yahay in aan bixiyo bil kasta?

- Haddii aad hesho caawimo loo marayo COPES, farmashiyahaaga kuguma soo dalaci karo lacag-bixinada la wadaago ee Qaybta D ee Medicare.

Halkeen wax badan ka ogaan karaa?

- Eeg mareegtadeenna hoose, nasoo wac, ama la hadal qof shaqaale ah oo jooga xafiiska HCS ama AAA ee degaankaaga.
- Buugyaraha Medicaid iyo LTSS-ga loogu talagalay dadka waaweyn dshs.wa.gov/sites/default/files/publications/documents/22-619.pdf.

La xiriir HCS/AAA haddii aad qabto su'aalo ku saabsan adeegyada LTSS

HCS (360) 725-2300 (TRS: 711)

Isniin– Jimco, 8 a.m. – 5 p.m.

AAA: 1-855-567-0252 (TRS: 711)

Barta internet-ka: dshs.wa.gov/ALtsa/resources



Washington State Health Care Authority



Haddii aad u baahan tahay in lagaa haqabtiro adeegyada qaar, ama aad u baahan tahay dokumentiyo qaab kale ah ama ku qoran luuqad kale, fadlan wac 1-800-562-3022 (TRS: 711)